BookTrust
Inspire a love of reading

# La akhrinta Ilmahaaga

4-6 sanno jir



booktrust.org.uk

# La akhrinta Ilmahaaga

La akhrinta ilmahaaga wuxuu macnaheedu noqon karaa inaad la wadaagto buuggaagta, sheekooyinka, heesaha, ama wixii kale oo qoraal ah.

Waxaad awoodaa inaad:

- Buuggaagta wada akhrisataan.
- Sheekooyin isku sheegtaan.
- Ka wada sheekeysataan wixii aad wada akhriseen.
- Ka wada hadashaan sawirrada ku jira buuggaagta.
- La wadaag sheekooyin xitaa marka uusan buugg ku hor oollin. Maxaa kuu diidaya in aad dib-u sheegtid sheekooyinka aad jeceshahay?



# Maxaad ugu akhrineysaa?

**Buuggaag iyo sheekooyin aad la wadaagto ilmahaaga waa madadaalo!**

Waa qaab wacan oo aad adiga iyo ilmahaaga ku wada dhisi kartaan xasuus iyo waqti khaas ah, wuxuuna si' fudud ku noqon karaa qeyb xiiso leh ee maalinta ka mid ah.

Waxay kaloo ka caawinaysaa ilmaha in ay:

- Fahmaan adduunka ku hareeraysan.
- Horumariyaan xirfadaha bulshada iyo dareenka.
- Horumar kaga gaaraan iskuulka dhinaca af Ingiriiska, sayniska, xisaabta iyo maaddoyin kale.
- Dhisaan isku kalsoonaanta xagga xiriirka dadka ah.
- Xoojiyaan ku-xirnaanshahooda ay adiga iyo xubnaha kale ee qooyskooda ku xiran yihiin.





# Maxaa nalaga doonayaa in aynu akhrinno?

**Waxaad akhrin kartaan wax kasta.**

Waxaad tijaabisaa buuggaag kala duwan sida kuwa sawirrada leh, kuwa qosolka, kuwa gabayada iyo heesaha.

Waxaad akhrin kartaa isla buuggii aad horey u akhriday adigoo misna ku soo celinaya mar labaad iyo mar saddexaadba. Buuggaagta la yaaqaan waa kuwo lagu raaxeeysto waxayna dhisaan isku-kalsoonaanta.

Waxaad dooran kartaa buuggaag cusub. Waxaad idinkoo wada jira qaadataan wax aad ka heli kartaan.

Buuggaagta ma ahan in ay noqdaan kuwo ay kalmaduhu ku badan yihiin.

Buuggaagta sawirrada leh ayaa ku habboon inaad ilmahaaga la wadaagto oo aad kala sheekeysato. Waxaad isticmaali kartaa sawirro si' aad sheekooyin u baarto iyo si' aad ilmahaaga uga caawiso inuu fahmo buuggaagta ay dhib badan tahay sidii loo fahmi lahaa.

- Soo hel maktabadda aagaaga oo eeg waxa uu ilmahaaga ka helayo.
- Weeydii macalimiinta, shaqaalaha maktabadda ama waalidiinta kale in ay kugula taliyaan wixii buuggaag ah.
- Si' aad fikrado u hesho  waxaad booqataa bogga internetka ee buug-raadinta loona yaqaan  Kalsoonida Buuggaagta: **booktrust.org.uk/bookfinder**
- Waxaad ka heli kartaa barnaamijyada kombiyuutarka ee sheeko-sheegista iyo weliba sheekooyin ku qoran tabletyada iyo kombiyuutarrada. Keliya waxaad xaqiijisaa inaad ilmahaaga la joogtid oo aad ku wada raaxeysataan sheekada aad la wadaageysid.





# Goormaan wax wada akhrinaynaa?

**La wadaag sheekooyinka goor kasta oo aad waqti u haysid.**

Toban daqiiqo oo aad maalin walba ilmahaaga wax la akhriso waxay keenaysaa is-beddel weyn.

- Buuggaag qaado si' aad mar waliba u heysid sheeko aad la wadaagto. Waxaad ku akhrin kartaa adiga oo saaran tareenka ama baska, ama xitaa marka aad wax sugeysaan idinka oo safka ku wada jira.
- Markaad bannaanka joogtaan, waqti qaado oo u kuur gal waxa agagaarkaaga ka dhacaya. Sheeko ka sameey waxa aad adiga iyo ilmahaaga wada aragtaan.
- Waqtiga hurdada waa waqtiga ugu fiican ee wax la wada akhristo. Waxay kaa caawinaysaa in ay noqoto wax joogto ah iyo iyada oo ay u noqonayso ilmahaaga sariir-aadista wax uu sugaayo in ay dhacdo. Waa waqti khaas ah oo waalidka iyo ilmaha ay wadaagayaan.



# Sidee?

**Soo hel meel xasilloon oo shanqar ku jeedisaa aan lahayn.**

Dami telefiishannada, radiyowyada, kombiyuutarrada iyo tabletyada. Qaado waqti aad bog waliba ku fiirinaysid.

Ma loo baahna inaad hubiso in ilmahaaga uu kalmad waliba saxay. Waa ok haddii aad labadiinuba khalad sameysaan! Ha kaala hadlaan sawirrada. Taasi waxay ka caawinaysaa in ay macne u raadiyaan iyo in ay ka fikiraan waxa ay ku arkayaan bogga ay akhrinayaan.

Ha hilmaamin inaad qososho. Haddii aad dareentid in ay caadi kuu tahay ka dhig wajigaaga mid maad leh oo aan xir-xirneyn, isu yeel dhawaaqyada xayawaanka iyo codadka jilayaasha – waxyaabahaan ayaa mar waliba aad uga qosliya ilmaha!

**Su'aalo weeydii markaad wax wada akhrineysaan.**

For example:

Tusaale ahaan:

- Maxaad ku aragtaa boggaan?
- Maxay kula tahay sida uu yahay dareenka jilayaasha?
- Maxaa dhici doona beey kula tahay?

Markaad dhammeysaan, ka hadla dareenka ilmahaaga ee ku saabsan buugga:

- Maxaa soo jiitay oo ay ka jeclaadeen?
- Maxaysan ka jeclaanin?
- Maxay ka xasuusan karaan wixii dhacay?
- Kee buu ahaa jilaha ay ka heleen? Sababta ay uga heleen?
- Isku xir sheekada iyo iyaga waxay waayo-arag u yihiin oo la soo darsay. Miyeey xasuusan karaan markii ay sameeyeen wax la mid ah sheekada?

**Waxaa muhiim ah, madadaalo wada qaata!**






# Ka warran haddii luuqadda Ingiriiska aysan ahayn luqaddeyda koowaad?

**Ma u baahnid inaad akhriso buuggaag af Ingiriis ku qoran oo keliya.**

Sii wad inaad wadaagtaan buuggaag, sheekooyin iyo heeso luqaddaada koowaad ah!

- Ilmahaaga waxaa laga yaabaa inuu kalmado af Ingiriis ah isticmaalo – waxaad ugu jawaabi kartaa ama ku soo celin kartaa waxa ay yiraahdeen adiga oo isticmaalaaya luqaddaada. Ilmaha waxay jecel yihiin dhawaaqa codkaaga waxayna la qabsan karaan labo luqadood.
- Wadaagista sheekooyinka waa mid kaweyn keliya in loo akhriyo si loo barto wax akhriska – waxay ku saabsan tahay in waqti la isla qaato iyo in hab la isa siiyo






# Ka warran haddii aan isticmaalayo tablet ama kombiyuutar?

**Buugaagta digitalka iyo barnaamijyada kombiyuutarka ee sheeko-sheegista waa madadaalo weeyn!**

Markaad wax akhrinaysid adiga oo isticmaalaya tablet ama kombiyuutar, la joog ilmahaaga. Kala hadal waxa ay sameynayaan, kana caawi sida loo isticmaalo qalabka.




- Waa fikrad wacan haddii qalabka laga dhigo 'Qaabka Diyaaradda' inta aan loo dhiibin ilmaha si' aad uga hor-tagto kharashyo lama filaan ah oo laguugu soo dallaco ama  gelitaan internetka ah.
- Weeydii isla su'aalihii ku saabsanaa sheekada adiga oo isticmaalaya buugg daabacan.



# Qofkee?

**Noqo doorkii ku dayashada mudnaa ee xagga akhriska!**

Ilmahaaga haddii uu arko adiga oo wax akhrinaaya, iyaguna waxay doonayaan in ay wax akhriyaan.



- Ka qeyb geli qooyskaaga waxa aad akhrineysid – ka hadal waxa aad akhrisay iyo waxyaabaha aad sheekada ka jeclaatay.
- Ku dhiirri-geli saaxiibbada iyo qooyska inay buuggaagta la wadaagaan ilmahaaga. Marba marka ka dambeysa oo ay ilmahaaga arkayaan dad wax akhrinaya, waxaa sii badan doonta rabitaankooda in ay wax akhriyaan.



# Maxaa xiga?

Booqo bogga internetka booktrust.org.uk si' aad u sii ogaato cajiibka waxyaabaha ku saabsan wadaagista lala wadaago ilmahaaga sheekooyinka, buugaagta iyo heesaha.

Waxaad kaheli doontaa:

- Tilmaamo iyo talooyin dheeraad ah.
- Ra'yi bixinno iyo dib-u-eegis ku saabsan buuggaagta.
- Ciyaaraha videowga.
- Sheekooyin aad dhageysan kartid ama akhrin kartid.
- Macluumaad ku saabsan barnaamijyadeenna.

**Akhris farxad leh!**

